



MIYAAN U BAAHAN NAHAY RUQSADA DHISMAHA?

Ruqsadaha ayaa laga doonayaa shaqooyin badan oo la xariira dhismaha lagana fuliyo Ismaamulka San Diego. Fadlan ka fiiri liiska shuruudaha guud ee ruqsada, xogta xariirka, iyo ilaha dheeraadka ah.

DARBIYADA DIFAACA



Darbiyada difaaca waxaa loo sameeyay inay celiyaan ciida ama waxyaabaha kale, taasoo abuuraysa labo heer oo kaladuwan. Haddii aad doonayso inaad dhisto darbiga difaaca oo ka wayn sadex (3) fiid joog ahaan, ama darbi kasta oo difaac oo leh joog kasta oo taageeraaya joog dheeraad ah oo ka sareeya darbiga (tusaale, aaga la maro), la tasho Adeegyada Dhismaha ee Ismaamulka si aad u waydiiso helitaanka ruqsad uu fasaxaayo Xeerka Dhismaha ee California.

Kala xariir Adeegyada Dhismaha lambarka (858) 565-5920 ama booqo

<https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/pds/bldg.html>

NIDAAMINKA

Nidaaminta ayaa la xariirta dhaqdhaqaaqa qaruuraxa si loo abuuro heerka salka ama dagaandeg gaar ah, caadian ku haboon dhismaha ama dhul falida. Haddii aad qorshaynayso si aad u nidaamiso fagaagyada ka wayn 200 oo kuubig oo agab ama aad u jajabiso (u jarto) dagaandeg ka sareeya sideed (8) fiid istaag ahaan, la tasho barnaamijka Hormarinta Dhulka ee Ismaamulka si aad u hesho ruqsada nidaaminta sida uu amraayo Xeerka Nidaaminta Jaayga ee Ismaamulka.

Kala xariir Adeegyada Dhismaha lambarka (858) 694-2055 ama booqo

<https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/pds/LandDevelopment.html>



GEEDO JARISTA

Geedo jarista waxaa laga wadaa jarista geedaha asal ahaan meesha ku yaalay. Shaqadaan ayaa caadiyan u baahan ruqsad, ilaa in geedaha laga jaraayo maahee meel 100 fiid kayar u jirta guriga dhanka aaga dabku ka yimaado ee degmada si looga hoRTago dabka. Shuruudaha ruqsada ayaa kaladuwan, marka la tasho Adeegyada Qorshaynta iyo Hormarinta ee Ismaamulka (PDS) si aad u hesho xog kahor intaadan geedaha jarin.



La xariir Xafiiska Xogta Aaga PDS ka oo aad ka wacayso (858) 565-5981

ama booqo www.sandiegocounty.gov/content/dam/sdc/pds/docs/pds800.pdf

MARINKA BIYAHA



Marinnada biyaha, ayna ku jiraan waraha biyaha sida wabiyada, balida, ama kanaallada biyaha, ayaa badanaa leh ilaha bii'o ahaan xasaasiga ah oo ay maamulaan wakaaladaha Maxaliga ah, Gobalka, iyo Federaalka ee Khayraadka. Kahor intaadan samayn dayactir ama dhismaha goob biyo maraan, la tasho Ismaamulka tsi loo go'aansho haddii ruqsado lagaa rabo.

La xariir Xafiiska Xogta Aaga PDS ka oo aad ka wacayso (858) 565-5981

RUQSADA GUUD EE DHISMAHA (CGP):



Shaqooyinka dhismaha ee keenaaya carqalada ku dhaacda dhulka hal (1) iikar ama ka badan ayaa u baahan karta ruqsada CGP oo lagasoo qaato Gudiga Gobalka ee Maamulka Khayraadka Biyaha (Gudiga Biyaha).

Kala xariir Gudiga Biyaha Iambarka (619) 516-1990,
ama booqo www.waterboards.ca.gov/water_issues/programs/stormwater/construction.html